Idaacada Baahinta Beenta Iyo Caloolxumada

January, 2010.

BBC-du waxay ahaan jirtay gole war murtiyeed, aqooneed,faneed, madadaalo,iwm. Waxay had iyo jeer ahaan jirtay gole u dhexeeya umadda Soomaliyeed,kuna adeega cadaalad ku salaysan ilaalinta xuquuqda bulshada Soomaaliyeed iyagoon eegayn degaanka. Waxyaalaha la odhan karo sabab bay u aheyd waxaa kamid ah shaqaalihii hore ee BBc-da oo lahaa sifooyinka:

-Xilkasnimo
-aqoon suxufinimo
-tayo shakhsiyadeed
-Soomalinimo ka reeban reernimada

Waxaasoo dhan waxaaa badalay shaqaale aqoontooda suxufinimo ku salaysan tahay dhawr tababar oo tayo daran,iyagoo lagu soo doortay reernimo si ay ugu adeegaan reerka ee aanay u adeegin bulsho weynta Soomaliyeed ,iyo iyagoon kuba abtirsan wax tayo shakhsiyadeed ood ka garan karto falalka keligii wax gartaha Yuusuf Garaad-markay inta kale ku sifoobeen inay garanayaan uun akhrinta warka loo soo diyaariyey ee aanay waraysi qaadi garaneyn, waxba soo diyaarin karayn-,kuwa Af-Soomaliga akhriskiisuba dhibayo,iyo kuwa dantooda gaar ka hor mariyey dantii ummada ee loo hawl galiyey.

Bal aynu in yar dib ugu noqono waayowaayo. Waxaa idaacadan BBC-da la asaasay xilli ku beegnayd bishii July 18,1957 .Waqtiyada ay hawada ku jiri

It (BBC Somali Section)has prolonged the Somali civil war. We are convinced that the grant from Her Majesty's Foreign Office was not intended to be used to harm innocent Somalis and prolong third world civil wars. Likewise, we doubt that the Broadcast Standards Commission would, if informed, permit Mr. Omar(Yussuf Garad Omar) to continue his efforts to implement his decaying clannish agenda.

SHASNA Editorial Board
(SOMALI HISTORICAL SOCIETY OF NORTH AMERICA)
MediaWatch
Boston, MA
USA

jirtay aad bey u yareyd marka loo eego iminka.Waxaase muran ma doonto ah in ay ka tayo badneyd, ka aqoon gudbin badneyd, ka shaqaale wanaagsaneyd,.Dhankaad doontaba ka eegoo waxay qayb horumarineed ka qaadan jirtay dhiancyada kala duwan ee bulshada sida siyaasada, dhaqaalaha, waxbarashada iwm. Waxaa taa muujinaysa sida ay u hanatey dhagahii bulsho weynta Soomaliyeed oo aad ugu kalsoonaa una hanqaltaagi jiray dhegaysigeeda xilli kasta.

Waxaa wanaagaasoo dhan dabargooyey ,kana dhigay in iminka lagu tilmaami karo gole laga hadaafey had u socodka barnaamijyadeeda , tayo li'ida shaqaalaheeda ,iyo ka madhnaanshaha ay shaqaalaheedu ka madhan yihiin aqoon suxufnimo marka laga tagi waayo tababaro gaaban oo tayo la' ooy qaateen.

Waxaa ayaandaro ah in baahinteedu manta ay ku qotonto baafinta beenta aan sal laheyn iyo colaadii degaano gaar ah loola jeedo.Waxaa xusuus mudan in rogaalcelinta taariikhda Soomaaliya(Italian Somalia) uu dajintii gole sharcidajineed oo ka koobnaa 60 xubnood uu xisbigii SYL ku shubasho iyo khiyaamo ka dib ku guulaystay ilaa 43 kursi ayna awood u heleen inay dhisaan dawladii u horaysay ee loo tababarayey la wareegida talada dalka(iminka la yidhaa Soomaaliya) .Waxaa xilligaa loo doortay hogaanka sare Cabdilaahi Ciise (Hawiye-Habargidir),hase yeeshee markii la gaadhey xilligii la wareegida talada dalka ayaa loo sahay qaatey sidii looga takhalusi lahaa Cabdilaahi Ciise oo loo keeni lahaa mid hogaansan.Waxaa si qarsoon loo soo caleemo saarey Aadan Cabdule Cismaan (Hawiye-Abgaal).
Dhacdadani waxay salka u sii qotomisay kala fogaanshihii labadaa reerood ee mid walba salaan laga dhigtay.Bal in yar u fiirso magacdan mar walba ,dhuuxna isafgarasho waayigii ka dhexeeyey iyo cida adeegsanaysay mar walba:

Habargidir	Abgaal
-Cabdilaahi Ciise	Aadan Cabdule Cismaan
-General Caydiid	Daahir Maxamuud Geelle
	Cali Mahdi
- Cismaan Caato	Generaal Salaad Gabeyre Kediye
- Ina Caydiid	Salaad Cali Jeelle
-Abdulkasim Salaad Hassan*	Xuseen Kulmiye Afrah
	Cali Maxamed Geedi
- Xasan Daahir Aweys*	Nuur Xasan Xuseen(Nuur Cadde)
-Aaden Xaashi Cayrow	Shariif Shiikh Axmad
- ina-daylaaf*	
-Indha Cadde*	
- Ina Darmaan*	
-Jeneral Galaal*	
-Goobaale*	
-Seeraar*	

* Dhamaan waa jufada hoose ee uu ka soo jeedo Yuusuf Garaad Cumar ee ah (Hawiye-Habargedir-Ceyr)

Marka aan yara jaleecno shaqaalaha ka shaqeeya BBC-da oo ugu yaraan boqolkiiba sagaashan (93%) ka soo jeedaan beesha hogaamiyaha laantaa .
Yuusuf Garaad Cumar ------ beesha Hawiye H/Gidir (Cayr),
Kaati Ciise beesha ------ Hawiye H/Gidir (Cayr)
Maxamed Maxamuud Cade------ beesha Hawiye H/Gidir (Cayr)
Yuusuf Xasan Mursal ------ beesha Hawiye H/Gidir (Cayr)
Maxamed Maxamuud Dhoore ------beesha Hawiye H/Gidir (Cayr)
Aamina Muuse Weheliye ------beesha Hawiye (Abgaal)
C/raxmaan Koranto beesha ------ (Geel-jecel),
Farxaan Axmed Jimcaale ------Beesha Hawiye (Xawaadle)
Ayaanle Xuseen ------Beesah Hawiye (Xawaadle)
Axmed Cabdi Nuur ------ Beesha Hawiye (Duduble)
Ibraahin Macalimu ------Beesha Hawiye (Baadi cade)
Bash-kash Jug soo dhacay------ Beesha Hawiye
Abokor Maxamed Boston ------Beesha Hawiye (Baadi cade).

Waydiinta u baahan in laga warceliyo waxay noqonaysaa siday suurtogal ku noqotay inay arintu sidaa u dhacdo oo qiyaasta caqligalka ahi sidaa u ciirto.Waxaad fahmaysaa inay salka meel lu leedahay.

Waxaa si cad loo soo bandhigi karaa qaabka foosha xun ee loo soo xero galiyo shaqalallaha dhaguhu ka didaan markay soo gudbinayaan barnaamijyada tayada daran.

Sheekh Yusuf Garad Cumar; Gudoomiyaha Laanta Af-Soomaaliga ee BBC-da

Sahal Cartan oo ka mid ah dhaggeystayaasha idaacadaa ayaa qoraal dheer ku xardhay erayadan: “Sidoo kale Maxamed Cabdillahi waxa uu ahaa madaxii ugu danbeyey ee laanta afka-soomaliga ee idaacada bbc, waxaan qabaa in aan idaacad si hufan,oo habsami ah u shaqeysaa, aaney ka danbeyn, ka dib markii Maxamed meesha ka tagay, waayo waxa uu haa shaqsi aad u dadaal badan, xushmeyn iyo qadarin balaaran ka kasbaday shaqaalahii la shaqeynayey, iyo dhamaan dhegeystayaasha soomaliyeed ee idaacada dhageysta,runtii waxaan qabaa in xiligii Maxamed uu idaacad maamulkeeda hayey, ay aad uga dhaqdhqaaq iyo dhaqan fiicneyd, sida ay maanta tahay . Maxamed waxuu ahaa shqsi mudo badan hawlaha warbaahinta ku soo dhex jiray, aan caadifi iyo qabiil midna aan lagu tilmaamin. Warar aad u faafay waqitguu shaqada ka tagay,
ayaa sheegay inuu Yusuf Garaad ka danbeeyey, shirqoolka shaqada uu Maxamed uga tagay”.

Dhigaalkani wuxuu dib inoo xasuusinayaa maahmaahdii Soomaalida ee aheyd “qof maqan tabistiis waa qof joogga ceebtiis”. Waxaad ka dareemaysaa dadweynihii dhageysan jiray idaacadaa inay dhamaan u boholyoobayaan maqalka coadadkii shaqaalihii xilkasnimada lahaa iyo barnaamijyaddii tayada hufan lagu xardhay. Tani waxay muujinaysaa inay BBC-da laanta Af-Soomaligu hanatey ummada Soomaliyeed muddo dheer oo ku dhaw konton gu’ .Waxaa gu’gii labada kun bilaabmay hoos u dhac aad loo dareemayey ilaa uu dhagaha ummada ka sii jeediyey u heelanaanta idaacadaa darxumada la yuururta baahinta beenta iyo colaada .

Waxaa danta gaar ee hogaanka goobtaasi la jaanqaadi waayey,hase yeeshee ay dadweynuhu aad u tabeen waa barnaamijyada la joojiyey ama la curyaamiyey ee ay ka mid yihiin :

-Barnaamijkii Qarnigii tagay iyo taariikhda -Soomaalida waxaa diyaariyey Aadan nuux dhuulo(iminka waa la soo celiyey iyadoo dhinaca danbe laga curyaamiyey)

-Barnaamijka Waydiin iyo Warcelin waxaa Isku hawli jiray Cabdilaahi Xaaji

- Barnaamijka Maxaan u Soojoogay barnaamij furan oo lagu martiqaaday dad sir iyo xoga haya

-Barnaamijka wargaysyada Geeska afrika

Waxaa runtii Ummada Soomaaliyeed uga hiiliyey ayaandaran ku habsatey markii ay faraha ka bateen golayaasha warbaahineed ee mareegaha iyo idaacadahaba.Waxaa tani digniin hor leh ay u tahay xubnaha ugu sareeya idaacada VOA laanteeda af-soomaliga ooy haboon tahay inay ka maaganaadan soo xero galinta wariyayaasha tilmaan reereedka (Abgaal-waceys) ….Idaacada VOA ayaa aad ugu tartameysa inay buuxiso kaalinta coded eey BBC-du baneysay , yaaneyse ka noqon Cabdilaahi Ciise ka qaad oo Aadan Cadde u dhiib talada. Waxaan ku soo gunaanadeynaa odhaahda Jaamac Aw Nuur oo si gaar ah farta ugu godaysa sida loola dhaqmo shaqaalaha goobtaasi markay waydaartaan ujeedada hogaamka.Waxaanu Jaamac qoraalkiisa dheer ku xardhay sedan:

“26.8.2000 xasuustayda Galaabtaa Ninkii warka Sheegayey wuxuu Dhanbaalka ku soodaray in Doorashada Dr Cabdil Qaasim tahay mid Isha lagu hayo,Nasiib daro Suxufigaas Codkiisii dib umamaqal walina waa ii dhiman yahay, shaanbad wayn ayaa shaatiga lagaga dhuftay dabadeedna shandasii ayaa dibada loodhigay wuxuuna maray wadadii Asxaabtiisii lafilka ahaa ay hore u qaadeen."cakuye wacnaan lahaydaa yusuf oo ragiisa weheshada"”.

Bahda Mareegta Farshaxan

Xigasho :
Mareegaha hadhwanaagnews, Farshaxan, Wardheernews,SomaliTirbune,iftin
Aminarts.
Wargeyska Geeska Afrika.